



**WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED
QAYBTA OTISMKA
40 Broad Street, 4th Floor, Boston, MA 02109**

FARRIIN KU SOCOTO QOYSASKA LEH ILMAHA QABO OTISMKA

**Farriin Muhiim ah oo ku Socoto Qoysaska Massachusetts
ee ilmohooda Da'diisu Ka Yar tahay 10 Sano
ee Lagu Sheegay Xanuunada Nooca Otismka
Xiliga Codsiga uu Furan Yahay Oktoobar 16, 2026 ilaa Oktoobar 30, 2026**

Qaybta Otismka ee Waaxda Adeegyada Koboca (DDS) ayaa maamushaa Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo taasoo hawlo farogelin ka samayso oo ka caawiyo ilmaha otismka qabo ee muujiyo caqabadaha daran ee dabeecadeed, bulshadeed iyo isgaarsiineed iyadoo lagu fulinaayo adeeg loo yaqaano **Awood Siinta La Ballaariyey, iyo Waxbarashada** (adeegyo iyo taageero tiro badan ee guriga dhexdiisa). Adeegan waxaa lagu qaban doonaa ilmaha gurigooda ama goobo kale dabiici ah iyadoo uu kormeero ka yahay shaqaale daawayn ee tababaran waxaana la heli karaa ilaa saddex sano markii la isu geeyo. Barnaamijkan ayaa sidoo kale bixiyo adeegyo taageero ee la xiriiro sida hawlaha dhexgalka bulshadda, tababarka qoyska, iyo nasashada. Markii lasoo afjaro saddexda sano ee adeegyada tirada badan, ilmaha ayaa awoodaa inuu helo adeegyo kordhin ah ee buuxinaayo baahiyadiisa oo na uga kaalmayn doono inuu la qabsado ka gudubka qaybta hawsha tirada badan ee Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo ilaa intuu ka gaaraayo ilmaha 10 jir.

U qalmitaanka: Shuruuda xigta ayaa loga baahan yahay ka qayb qaadashada barnaamijkan caawinta:

1. Ilmaha waa inuu leeyahay **aqoonsi xanuuneed la xaqiijiyay** ee Xanuunka Noocyada Otismka, taasoo ku xiran xaqiijinta ay samaynayso Waaxda Adeegyada Kobocood.
2. Ilmaha waa inuu gaarin 10 jir. Ilmaha markay dhashaan ilaa sanadkooda 9aad way ka qayb gali karaan.
3. Ilmaha waa inuu yahay mid deggan Massachusetts.
4. Ilmaha waa inuu fulinaayo heerka adeega caafimaad ee loga baahan yahay adeegyada lagu qabanaayo Xaruunta Adeeg Bixinta Dhexe ee logu talagalay dadka leh Laxaad La'aanta Garaadka (ICF/ID) sida ay ku qiimeysay WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED.
5. Qoyska inay doortaan inuu ilmaha ku qaato adeegyada guriga iyo bulshadda.
6. Ilmaha waa in si nabadgeliyo leh logu adeegi karo bulshadda dhexdeeda.
7. Ilmaha waa inuu leeyahay qof sharciyan masuul ka ah oo maamuli karo adeegyada iyo caawinaadda barnaamijka.
8. Ilmaha waa inay wakaaladda MassHealth u qiimeyso inuu u qalmo caymiska Guud ee MassHealth, markii lagu saleeyo dakhliga qoyska. **Markii la eego qoysaska oon wali codsi u samaynin MassHealth, tani waa qasab in la sameeyo goorta la buuxinaayo Foomka Codsiga Barnaamijka Furan ee Caawinta Ilmaha Otismka Qabo.** (Tilmaanta ku saabsan habka codsiga logu sameeyo MassHealth ayaa ku yaalaan bogga xiga)

Dhammaan adeegyada ayaa uga baahan inuu ilmaha weli buuxiyo shuruudaha u qalmitaanka lacageed iyo caafimaadeed ee Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo inta ay ka diiwan geshan yihiin barnaamijka.

Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo ayaa sii wadi doono inuu u adeego ilmaha qabo xanuunada nooca otismka oo fulinaayo shuruuda u qalmitaanka Barnaamijka, ilaa intay ka gaarayaan 10 sano jir. Xiligan hadda la joogo barnaamijka ayaa u adeegi karaa taqriiban ilaa 500 oo arday sanad walba.

Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo ayaa boos u reebaa (55 boos ee gobolka dhan) ee carruurta da'da 3 sano jirka ah iyo kuwa ka gudbaayo Farogelinta Xiliga Hore. Dad badan ayaa ka gudbaan barnaamijka sanad walbo, sidaa darteedana, waxaanu ku buuxinnaa boosaska bannaan liiskan Codsiga Furan. Qaybta Otismka ayaa fursad ka bixinaysaa in codsi hadda la sameeyo si loga qayb noqdo dadka laga dhex dooran doono. Qaybta Otismka ayaa qabatay codsiga furan ugu dambeysay Oktoobar 2025.

Xiliga Codsiga Furan ee 2026 wuxuu socdaa ka bilaabato Oktoobar 16, 2026 ilaa Oktoobar 30, 2026. Fadlan hubi inaad BOOSTADA, IIMAYLKA ama ONLINE-ka ku buuxiso codsiga inta u dhexeyso Oktoobar 16ka 2026 iyo Oktoobar 30da 2026. Qaybta Otismka ayaa tuuri doonto gudbinada lagu sameeyey xiligan xili ka baxsan. Qaybta Otismka MA aqbalaysa codsiyada gacanta lagusoo gudbiyo. Haddaad gudbisay codsi inta lagu jiray Codsiga Xiliga Codsiga Furan ee la soo dhaafay ee Oktoobar 2025, WAA QASAB INAAD DIB USOO GUDBISO CODSI CUSUB SANADKA 2026.

Habka looga Qayb Galo Geedi Socodka Codsiga Furan:

1. Qaado koobiga *Codsiga Xiliga Codsashada Furan*

- a. Fadlan la xiriiir Xaruunta kuugu dhaw ee Caawinta Otismka (eeg hoosta) si aad ugu samayso codsi *Codsiga Xiliga Codsashada Furan*.
- b. Xaruumaha Caawinta Otismka ayaa kuu furan si ay kaaga caawiyaan buuxinta codsiga.
- c. Dhammaan foomamka ayaa sidoo kale lagu daabaca bogga internetka DDS: [Dulmarka Barnaamijka DDS ee Adeega Ka Cafinta Shuruudda Ilmaha Otismka | Mass.gov](#)
- d. HAL CODSI OO KELI U SAMEE CUNUG WALBA—Qaybta Otismka way tuuri doonaan codsiyaalka hal ka badan. Qaybta Otismka ma aqbali karto foomamka gacanta lagusoo gudbiyo.

2. Buuxi *Codsiga Xiliga Codsiga Furan*. Waxaad u baahan doontaa:

- a. taarikhda dhalashada ilmahaaga
- b. lambarka badqabka bulshadeed ee ilmahaaga
- c. lambarka aqoonsiga ilmahaaga ee MassHealth

3. Habka loo Gudbiyo *Codsiga Xiliga Codsiga Furan*:

a. Boostada.

- i. Dhamaan codsiyada waa in ay leeyhiin Calaamad Boostada ama Shaabada Boostada Taarikhda Oktoobar 30, 2026
- ii. Fadlan ku buuxi foomka Qalinka Qadda Sii Fasiix na U Qor
- iii. Fadlan Ugu soo Dir Boosta Foomka Cinwaanka Xiga:
DEPARTMENT OF DEVELOPMENTAL SERVICES - AUTISM DIVISION
ATTN: Autism Waiver Program Open Request
40 Broad Street, 4th Floor
Boston, MA 02109

b. Iimaylka

- i. Dhamaan codsiyada waa in lagu diro iimaylka DDS-ChildrensAutismWaiverProgram@mass.gov
- ii. Dhamaan codsiyada waa in si toos ah loga diro iimaylka Waalidka/Ka masuulka oo Keli ah
- iii. Dhamaan codsiyada waa in iimaylka lagu diro taarikhayada u dhexeeyo Oktoobar 16, 2026 – Oktoobar 30, 2026
- iv. Foomka waxaa lagu buuxin karaa si elektroonig ah ama la daabici karaa, sidoo kale na qaab fasiix na intii logu qoro na la sawiro ayaa iimaylka lagusoo diri karaa
- v. Foomyada lifaaqsan ayaa lagusoo diri karaa noocyadan xigo: PDF (waa nooca la doonayo), JPG haduu si fiican u muuqdo
- vi. Hadii aad ku buuxinayso telefoonada smart-ka/tablet soo daji app bilaash ah oo warqadaha lagu sawiro ka dib na nooca PDF-ka ku soo dir faylka.

c. **Online-ka Ku Buuxi**

- i. Codsiga waxaa lagu buuxin karaa iyadoo la adeegsanaayo link-ga xiga: **Muuujinta Danaynta Codsiga Furan ee 2026**
- ii. Codsiga waxaa lagu samayn karaa ka dib markii la iskaan gareeyo calaamadda xigta ee QR:



- iii. Dhammaan codsiyaalka waa in online-ka lagu buuxiyo inta u dhexeysa Oktoobar 16, 2026 – Oktoobar 30, 2026

d. **Fakis ugu dir 1-857-323-8379**

Waa mudnaanta Qaybta Otismka ee DDS inay xaqiijiyaan in geedi socodka lagu codsanaayo ka qayb galka Barnaamijka Ka Cafinta Shuruudaha ee Ilmaha Otismka Qabo ay si buuxdo u heli karaan qoysaska iyo ilmaha otismka qabo oo weliba ka soo jeedo asal luuqadeed iyo dhaqammeed ee kala duwan. Qoraalada ayaa lagu heli karaa Afamxaarada, Afcarabiga, Afjayniska (Mandarin iyo Cantonese), Afka Haitian Creole, Afka Cape Verdean Creole, AfPortuguese (Yurub iyo Baraasiil), Afruushka, Isbaanishka, Afturki, AfVietnamese, AfNepali iyo Afsoomaali.

Fasiraada iyo Turjubaanka ayee dhammaan ka qayb galeyaalka ku heli karaan bilaash.

Habka Codsiga logu Sameeyo MassHealth: Waxaad codsi ugu samayn kartaa MassHealth mid ka mid ah siyaabaha xiga:

- Haddii aad akoon leedahay, ka gal akoonkaada <https://www.mahealthconnector.org/> halkaa na ka codso MassHealth
- Haddii aad akoon lahayn, habka ugu dhaqsaha badan ee online-ka logu codsado oo na logu hagaajisan karo akoon ilaashan ee online ah waa <https://www.mahealthconnector.org/>.
- Buuxi oo na saxiix [Codsiga Massachusetts ee Caymiska Caafimaadka Guud iyo Caafimaadka Ilkaha iyo Caawinta Xagga Kharash Bixinta](#)
Ka dib na boostada ugu dir:
Health Insurance Processing Center
P.O. Box 4405
Taunton, MA 02780
ama Fakis ugu dir 1-857-323-8300
- Ka wac Xaruunta Adeega Macaamilka MassHealth lambarkan 1-800-841-2900 (TTY: 1-800-497-4648 logu talagalay dadka Dhagoolka, sida fudud waxba ku maqlin, ama leh laxaad la'aanta hadalka) ama 1-877-MA ENROLL (1-877-623-6765).

Si aad u hesho maclumaad dheeraad ee ku saabsan Barnaamijka Caawinta Otismka

- Booqo Bogga DDS: [Dulmarka Barnaamijka DDS ee Adeega Ka Cafinta Shuruudda Ilmaha Otismka | Mass.gov](#)
- La xiriiir Xaruuntaada kugu dhaw ee Caawinta Otismka hoosta ku taalo
- Iimayl nogu soo dir DDS-ChildrensAutismWaiverProgram@mass.gov ama
- Ka wac Qaybta Otismka ee DDS lambarkan 617-624-7778.

XARUUMAHA ADEEGA ILMAHA OTISMKA EE DDS:

Massachusetts Galbeed

Autism Connections, Barnaamijka ServiceNet

11 Village Hill Road

Northampton, MA 01060 | (413) 585-8010

Massachusetts Dhexe

Xaruunta Khayraadka Otismka, Barnaamijka U

Doodeyaasha

712 Plantation Street

Worcester, MA 01605 | 508-835-4278

MetroWest

Autism Alliance, Barnaamijka U Doodeyaasha

1881 Worcester Rd, # 100A

Framingham, MA 01701 | 508-652-9900

Magaalada Boston iyo Agagaarkeeda

Vinfen

1208A VFW Parkway

West Roxbury, MA 02132 | 617-206-5038

Gobolka Norfolk

Lifeworks: Xaruunta Qoyska Otismka

789 Clapboardtree Street

Westwood, MA 02090 | 781-762-4001

Koonfur Bariga Massachusetts

Khayraadka Otismka Bulshadda (CAR)

40-A Dean St,

Taunton, MA 02780 | 508-379-0371

Waqooyi Bariga Massachusetts

Northeast ARC (NEARC) Xaruunta Taageeraha

Otismka

100 Independence Way-Suite D3

Danvers, MA 01923 | 978-777-9135